



BADBAADADA DABKA EE GURIGA



Norsk
brannvernforening


brannvernforeningen.no

QALABKA QIIQA URIYA OO WAAJIB AH



Waa in guri kaste uu dabaq kaste ku yeesho ugu yaraan hal qalab oo qiiqa uriya. Qalabka qiiqa uriya waxay digniin hore u bixiyaan marka dab dhasho. Waa in aad qaylodhaanta ka maqli karto qolalka hurdada gudahood marka albaabbadu xiran yihiin. Baatariga waa in caadi ahaan laga beddelo sanadkiiba mar. Qaylodhaamahaaga qiiqa si joogto ah u tijaabi adigoo badhanka tijaabinta riixaya.

QALABKA DAB DEMISKA OO WAAJIB AH




Waa in guri kaste uu yeesho tuubo dab ama dab demiye. Waxaa lagugula talinayaa in aad labadaba haysato. Qalabka dab demiska waa in la dhigo meel si fudud loo gaari karo. Dhammaan dadka guriga ku nool waa in ay ogaadaan halka qalabku yaallo. Si taxaddar leh u akhriso tilmaamaha ku saabsan sida loo isticmaalo.

KA HORTAGGA DABKA 1




Isha ku hay shooladda marka aad isticmaalayso. Haddii aad wax kale kaga jeedsanayso cuntada aad karinayso, wada xir badhannada wareega ee shooladda ku yaalla. Rakibo qaylodhaan shoolad/qalab toos u demiya. Taxaddar muuji marka aad dab ololaya isticmaalayso. Weligaa ha ka bixin qol shumac daaran ku jiro. Shumacyada daaran lama ag dhigi karo shayada guban og. Dambaska ku shub meel nabad ah. Dambaska kulul ha ku tuurin baaldiga qashinka.

KA HORTAGGA DABKA 2



Marwalba demi qasaaladaha iyo qallajiyeyaasha marka aad guriga ka baxayso ama hurdo tagayso. Koronto yaqaannada la aqoonsaday keligood ayaa loo oggol yahay in ay rakibaan oo ay dib u hagaajiyaan qalabka iyo alaabta korontada ku shaqeeya. Shayada wax lagu dhiso, kartoonnada iyo qashinka kale ee meel lagaga tago ayay badi isticmaalaan dadka meelo guba. Hubi in jaranjarooyinka iyo garaashyada aanay ku jirin alaab guban og. Waxyaabaha qashin ku jiro dhig meel dhismeyaasha ka fog.

WAXA HABBOON IN AAD SAMAYSO HADDII DAB DHASHO



1) BADBAADI

Hubi in dadkoo dhan nabad kaga baxaan. Waxaa khatar leh in qiiq la dhex maro marka la baxsanayo. Albaabbada xir. Tag barta hore loogu heshiiyey in la isugu yimaaddo.

2) KA WAR GELI

Ka war geli adeegga dab demiska adigoo wacaya lambarka xaaladda degdeg ah ee 110. U sheeg cinwaanka sax ah ee dhismaha gubanaya.

3) DEMI

Haddii dabku uusan weli aad u weyneyn, isku day in aad ku demiso tuubada dabka ama dab demiyaha. Naftaada halis ha gelinin. Qiiqu waa wax sun badan.

Sida aad xaaladda u aragto ama qiimaynta aad ka qaadato ayaad ku go'aamin doontaa sida aad tallaabooyinkan isugu xigsiinayso. Waxaa waxtar leh in si joogto ah loo sameeyo carbisyo dabka ku toosan, si dadkoo dhan tababbar uga qaadan karaan waxa habboon in la sameeyo



Buuggan macluumaadka waxaa lagu heli karaa in ka badan 30 luqadood oo kala duwan waxaana laga heli karaa barta internetka Ururka Badbaadinta Dabka ee Norway: www.brannvernforeningen.no/brannsikker